

TILMAAMAHA LA SIIYO BUKAANKA DAWEYNTA NUKLEARKA KLIINIKADA MANKATO

SKANKA LAFTA - JIRKA OO IDIL

Bone Scan Whole Body - Somali

Bukaanka: _____

Taariikhda Ballanka: _____

Waqtiga Ballanka: _____ am/pm

Goobta: Waaxda Daweynta Nuklearka Kliinikada Mankato – Dabaqa Kowaad
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

Maxay tahay Skanka Lafta Jirka oo Idil?

Skanka lafta waa daraasadda sawirka Daweynta Nuklearka loo adeegsado baarista iyo la socoshada dhowr nooc cudurada ku dhaca lafaha, waxaana la qiimeeyaa sida lafaha nool ugu qeybsan yahiin jirka. Waxaa la dalbi karaa skanka lafta haddii bukaanka uu qabo xanuunka lafaha oo aan la macneyn karin taasoo soo jeedisa luminta lafta, cudurada ku dhaca lafta, ama dhaawac aan lagu ogaan karin raajada-X ee caadiga ah. Waxaa kaloo loo isticmaalaa in lagu ogaado kansarka ku fidday lafta taasoo ka dambeyso nabar ku bilowday xubin kale.

Baaristaada Ka Hor

- Iska ilaali in aad qaadatid suunka birta, waxyaabaha isqabsada, galuusyada ama waxyaabaha leysku qurxiyo.
- Waxaa xiddidka lagaaga duri doonaa maadada shucaaca raadiyaha, saddax saac skanka ka hor.
- Maadada shucaaca raadiyaha waxay fududeysaa in lafahaada lagu arko skanka.
- Duridda kaddib, waxaad ka tagi kartaa kliinikada.
- Fadlan cab 4-6 (8 waqiyad halkii) oo dareere ah. Waxaad cunto cuni kartaa sida aad caadi ahaan u cuntid.
- Haddii aad qabtid qufac waqtiga baarista, fadlan soo qaado dawooyinka joojiya qufaca/shorobo.
- U sheeg bixiyahaada haddii aad naas nuujisid, haddii aad tahay xaamilo ama aad u maleysid in aad xaamilo noqon doontid.

Inta ay Socoto Baarista:

- Waxaad u seexan doontaa dhabarka adiga oo ku seexda miiska sawirka.
- Sawirada waxaa laga qaadi doonaa dhererka jirkaada, waxaana loo adeegsan doonaa kaamera khaas ah.
- Waxaad u baahan tahay in aad seexatid waqtiga sawirka.
- Baarista waxay qaadataa 45 daqiiqo.

Baarista Kaddib:

- Waxaad ku soo noqon kartaa hawlahaada caadiga.
- Xafiiska bixiyahaada ayaa kaala soo xariiri doono natiijada baarista.

Fadlan iska xaadiri Diiwaan Gelinta Dhexe marka aad timaadid.

Haddii aad u baahan tahay in aad dib u dhigatid ama joojisid ballanka, ama haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan baaristaan, fadlan wac 507-385-3955.